

King County Metro Accessible Services (Adeegyada Fudaydinta Gelitaanka ee King County Metro)

Metro Accessible Services waxay maamushaa adeegyada u hagaajiya gelitaanka dadka waayeelka ah iyo macaamiisha curyaamiinta ah oo ay ku jiraan howlaha Access Paratransit Service, Transit Instruction, Taxi Scrip iyo Community Access Transportation Program (CAT). Wawaanu sidoo kale maamulnaa xarunta ilaha gaadiidka ee Getting There (Tegitaanka Meesha). Waxaa dheeraad ku ah barnamijyadaas, Accessible Services in ay la shaqeyyaan dhamaanba kooxaha King County Metro si ay u hubiyaan in adeegyada la bixiyey ay waafaqsan yihiin shuruudaha Sharciga Curyaanimada Ameerika (ADA).

- **U-hogaansanaanta ADA ee ee Adeegga Baska Metro**

Shaqaalaha Accessible Services waxay u shaqeyyaan illo ahaan dhammaanba Metro si ay u hubiyaan in adeegyada basku ahaadaan kuwo la geli karo. Dhammaanba basaska Metro waxay ahaayeen kuwo la geli karo ilaa iyo 1999. Metro waxa ay hadda ku howlaha yihiin in ay basaska oo dhan u sameeyaan sagaxad hoos u taal bacdamaa ay badaleen basaskii hore ee lahaa wiishka. Basaska leh sagaxda hoos u taal ma laha jarjanjara albaabka. Taasoo ka dhigaysa mid fudud in la koro. Basaku waxay leeyihin meel ay ka kori karaan kursiga curyaamiintu iyo xaga hore ee baska hoos ayaa loo dhigi karaa taasoo sahleeysa in si fudud loo koro.

- **Getting There Transportation Resource Center (Xarunta Illaha Gaadiidka ee Takitaanka Meesha)**

Available in alternate formats upon request.
Contact 206-263-3113, TTY Relay: 711

Xarunta Illaha Gaadiidku waxay la shaqeeysa Harborview Medical Center. Xarunta waxaa loo sameeyay in ay ka caawiso dadka curyaamiinta ah sidii ay si dhib yar ugu geli lahaayeen gaadiidka ka shaqeyya King County. Shaqaalo gaar ugu tababaray dib u hagaajinta ayaa kula kulmaya, iyagoo qiimeeynaya awoodaada shaqsiga ee raacitaanka baska. Xaruntu waxay leedahay meel hoose oo bas oo kale ah si shaqaalahu u qiimeyaan awooda uu shaqsigu ku kori karo oo uga degi karo baska.

Markii aad soo booqato xarunta illaha gaadiidka, shaqaalahu waxay ka caawin karaan helitaanka ilaha kale ee gaadiidka aad u baahan tahay. Kuwaas waxaa ka mid noqon kara adeegyada caadiga ah ee baska Metro, Access, Taxi Scrip, Transit Instruction, CAT services, gaadiidka caafimaadka Medicaid iyo adeegyada kale ee bulshada. Shaqaalahu waxay kaloo kaa caawin karaan haddii ay jiraan dhibaatooyin kale oo kaa hortaagan inaad isticmaasho adeegyada baska caadiga ah ee degaanka. Qalabka nabadjelyada iyo dharka meelaha fog laga arko ayaa laga heli karaa si ay uga caawiso darawaladu inay ku arkaan markii aad banaanka joogto. Haddii aad tahay qof curyaan ah oo caawinaad uga baahan, gelitaanka gaadiidka degaankaada la xariir 206-263-3113. Turjibaan ayaa lagu qaban karaa ballantaada. Xasuuso inaad codsato mid marka aad ballanta sameeysanayso.

- **Transit Options (Ikhtiyaarada taraansitka)**

Metro waxay siiyan dadka waayeelka iyo curyaamiinta fursado ay ku bartaan isticmaalka baska. Adeegan, oo la yiraahdo casharada gaadiidka waxay ka caawin kartaa sidii aad ku ogaan lahayd halka baska loo istaago iyo waddooyinka kugu haboon ee aad isticmaali karto. Macalin qibrad u leh basaska ayaa kula

shaqeeyn doona. Macalinku baska ayuu kula raaci doona oo si fudud ayuu kugu bari doona sida baska loo raaco ilaa iyo inta aad ka baranayso isticmaalka baska. Transit options waxay kaloo fursad ku siinayaan sidii aad u baran lahayd sida baska loo koro ee looga dego adiga oo ku jira kursiga curyaanka ama skooterka. Midaasi waxay aad kugu fiican tahay haddii aad mar dhoweeyto bilooowday isticmaalka kursiga. Wax baritaan koox ahaaneed ayaa la heli karaa. Tababare ayaa u iiman kara kooxdiiна oo u sheegi kara sida baska loo isticmaalo, ka jawaabi doona su'aalaha aad qabtaan oo markaasna kooxda u wadi doona safarka baska. Haddii aad doonayso safarkaas Doorashooyinka Gaadiidka wac 206-749-4242. Turjibaano ayaa diyaar u ah tababarada shaqsi iyo koox ahaanba.

Mobility Specialists waxay sidoo kale ku raacayaan, cabbirayaan iyo masawiro uga qaadayaan jidka aad u marto meesha baska lagu sugo, si ay u eegaan haddii ay jiraan wax kaa xanibaya inaad si fudud u isticmaasho adeega caadiga ah ee baska

- **Access Transportation (Gelitaanka Gaadiidka)**

Sida ku qoran sharciga ADA, Metro waa inuu siiyaa adeegyo fudud dadka curyaamiinta ah mar kasta iyo goob walbaao maquul ah uuna siiya howlaha caadiga ah ee baska. Access waa howlaha baaburta fanka ee dadka curyaamiinta ah ee aan raaci karin baska caadiga ah curyaanimo daraadeed. Si aad ugu qalanto Access waa in mid ka mid ah waxyaabahaan aad soo buuxisa curyaanimo daraadeed:

- Ma awoodid inaad raacdoo, ama ka degto qaar ama dhammaanba baabuurta gaadiidka dadweynaha ee King County.

- Waxaad u baahan tahay wiish si aad kursiga fadhiga ugu korto baska.
- Ma awoodid inaad gaartid ama ka timaado qaar ama dhammaanba goobta baska ama stashinka tareenka.

Haddii aad u qalanto adeegyadaas, fan iyo darawal ayaa ku iman doono si ay ku qaadaan, kadibna ku geyn doona meesha aad u socoto haddii ay tahay meelaha uu gaadiidku ka shaqeeyo. Sababtoo ah Access waxa uu la mid yahay adeegyada basaska, darawalka fanka waxaa laga yaaba inuu macaamiil kale sii qaado iyo dejijo. Waqtiyada raacitaanku waxay la mid yihiin kuwa baska. Haddii aad awoodo inaad u isticmaasho baska caadiga ah meelaha qaarkood, ma awoodi doontid inaad isticmaasho adeegyada Access safaradaas. Balan waxaa lala sameeysan karaa hal ilaa sadex maalmood ka hor. Haddii aad adiga ama qof aad taqaan doonayo Access, wac 206-263-3113. Turjibaanada telefoonka ayaa diyar kugu ah – u sheeg qofka telefoonka ka jawaaba luqada aad doonayso oo waxay qadka ku soo gelinayaan turjibaan.

- **Community Access Transportation (Gaadiidka Bulshada ee Access) (CAT)**

Barnaamijka Metro ee CAT waxa uu raadinayaan sidii loo sii balaarin lahaa gaadiidkadadka waayeelka iyo curyaamiinta iyagoo la shaqeeyaa hayadaha bulshada. Wac 2-1-1 si aadu hesho gaadiidka degaankaada – u sheeg qofka telefoonka ka jawaaba luqada aad doonayso oo waxay qadka ku soo gelinayaan turjibaan.

- **The Hyde Shuttle (Faan Bilaasha)**

Hyde Shuttle waa adeegyada ugu balaaran ee ay bixiso barnaamijka CAT. Faan bilaasha oo lagu qaado dadka ka weyn 55 iyo dadka

curyamiinta ah waxayna shaqeeynaan maalmaha shaqada kana shaqeeyaa King County. Fanku waxa uu qabtaa adeegyada geynta guriga ilaa iyo guriga ee deriska aad degen tahay. Wac 2-1-1 si aad ku ogaato haddii deriskaadu leeyahay fan - u sheeg qofka telefoonka ka jawaaba luqada aad doonayso oo waxay qadka ku soo gelinayaan turjibaan.

- **Taxi Scrip iyo Accessible Taxis**

Barnaamijka Taxi Scrip waxa uu bixiyaa adeegyada taksiga oo raqiis ah oo uu siiya dadka curyaamiinta ah iyo waayeelka daqligoodu yar yahay. Si aad ku codsato barnaamijkaas, wac Metro Customer Services (Qeybta Macaamiisha Metro) 206-553-3000. Turjibaanada telefoonka ayaa diyaar kuugu ah - u sheeg qofka telefoonka ka jawaaba luqada aad doonayso oo waxay qadka ku soo gelinayaan turjibaan. Markii lagu ogolaado Barnaamijka Taxi Scrip, waxaad u qalmi doonta inaad iibsato illaa iyo toddobo buug oo taksiga bishiiba. Buug walba waa \$5 oo waxa uu u dhigmaa \$10 oo qarashka taksiga ah. Buuga taksiga ma dhaco, marka waxaad isticmaali kartaa markiiba ama u dhigan kartaa xaaladaha degdegta ah.

Sannadkii 2006, shaqaalahaa Accessible Services waxay ka shaqeeyeen inay taksiga ka dhigaan ku fudud. Hadda waxaa jira 45 taksi oo ay kori karaan kursiga fadhiga oo ka shaqeeya Seattle iyo King County.